GARGAAR DHAQAALE

MACLUUMAADKA QOYSASKA

Ilmo kasta oo reer Fiktooriya ahi waa inay hastaan marin ay ku gaadhayaan fursadaha waxbarasho adduunka ee ka jira fasalka ka dabadiisa. Kaamamka, Ciyaaraha iyo Dalxiiska waxay ka caawisaa hubinta in ardayna aanu luminayn fursadda uu ugu biiri karo fasalka ay dhigtaan hawlo muhiim ah, waxbarasho iyo madadaalo leh. Waa qayb ka mid ah samaynta Fiktooriya Waxbarashada Gobolka iyo ka go'anaanshaha dawladda ee ah inay jebiyaan xidhiidhka ka dhexeeya halka uu ardayga ka soo jeedo iyo natiijooyinkooda.

KAAMAMKA, CIYAARAHA & MAALIYADA DALXIISKA (CSEF)

Kaamamka dugsigu waxay siiyaan carruurta waayo-aragnimada dhiirigelinta leh ee bannaanka weyn. Dalxiisyadu waxay dhiirigeliyaan faham qoto dheer oo ku saabsan sida dunidu u shaqeyso iyada oo ciyaaruhu barayaan wada shaqaynta, anshaxa iyo hoggaaminta. Dhammaan waa qayb ka mid ah manhaj caafimaad leh.

CSEF waxa bixisa Dawlada Fiktooriya si ay u caawiso qoysaska xaqa u leh si ay u daboosho kharashaadka safarada dugsiga, kaamamka iyo hawlaha ciyaaraha.

Haddii aad haysatid kaadhka lacag dhimista ee macnuhu-tijaabiyay oo ansax ah ama aad tahay waalid korinta ku meel gaadhka ah,taageerada ardayga guriga ka taga waxa laga yaabaa inaad xaq u lahaatid CSEF. Qayb tixgelin gaar ah ayaa sidoo kale u jirta magangalyo-doonka iyo qoysaska qaxootiga ah. Kaalmada waxaa lasiiyaa dugsiga si loogu isticmaalo kharashyada la xidhiidha kaamamka, dalxiisyada ama nashaadaadka isboortiga ee faa'iidada u leh ilmahaaga.

Qadarka sanadlaha ah ee CSEF arday kasta waa $400 dhammaan ardayda dugsiga.:

SIDA LOO CODSADO

Codsadayaasha cusub waa inay la xidhiidhaan xafiiska dugsiga si ay u helaan foomka codsiga CSEF ama ka soo dejiyaan shabakada hoose.

Haddii aad ka codsatay CSEF dugsiga ilmahaaga sannadkii hore, uma baahnid inaad buuxisid foomka codsiga sanadkan ilaa uu jiro isbeddel ku yimid xaaladda qoyskaaga.

Kaliya waxaad u baahan tahay inaad buuxisid foomka codsiga haddii mid ka mid ah isbeddelladan soo socda ay dhaceen:

- **diiwaangelinta arday cusub:** ilmahaagu wuxuu bilaabay ama bedelay dugsiyo sanadkan.
- **duruufaha qoyska oo beddelay:** sida beddelka xannaanaynta, beddelka magaca, lambarka kaadhka lacag dhimista, ama walaalo cusub oo sannadkan kugu soo biirey.

Ka hubi xafiiska dugsiga haddii aadan hubin

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan CSEF booqo:
https://www.vic.gov.au/camps-sports-and-excursions-fund